



Macluumaad muhiim ah oo loogu talagalay dad qaata daawooyinka macaanka (marka laga reebo insuliinka)

25ka Noofambar 2024, waxaan baddaleynaa shuruudaha lacag celinta ee daawooyinka qaar kuwaasoo loo isticmaalo daawaynta nooca 2 ee macaanka. Dhabarka dambe ee boggan, waxaad ka arki kartaa in tani ay wax saameyn ah ku yeelan doonto daawadaada.

Xusuunow: Haddii daawadaada aan lagu xusin dhabarka dambe ee boggan, wax isbaddal ah kuma dhacayo daawayntaada, mana u baahnid in aad wax samayso.

Haddii daawadaada lagu xusay **liiska jaalaha ah**, waxaa suurtagal ah inaad mutaysato lacag celin haddii dhakhtarkaagu ogaado inaad buuxisay shuruudaha cusub ee lacag celinta.

Haddii daawadaada lagu xusay **liiska cas**, masii mutaysan doontid lacag celinta ootomaatiga ah, balse dhakhtarkaagu, xaalado gaar ah, uu kugu matali karo inuu codsi lacag celin kuu sameeyo.

La hadal dhakhtarkaaga

Haddii daawadaada lagu qoray dhabarka dambe ee boggan, waa inaad dhakhtarkaaga kala hadashaa daawayntaada mustaqbalka si aad u xaqiijiso inaad wali mutaysan doonto lacag celin wixii ka dambeeya 25ka Noofambar 2024. Waxaan kuu soo jeedinaynaa inaad sidaas sameeyso iyadoo lala xiriirinayo baaritaankaaga xiga mise inaad cusbooneysiiso daawadaada. Sidoo kale dhakhtarkaaga ayaa lagu wargaliyay isbaddaladan.

Ma rabtaa inaad wax badan ogaato?

Waxaad websaydkeena ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan isbaddalada lacag celinta:

www.lmst.dk/tilskud-aendringer-diabetesmidler-non-insuliner

Waxaad sidoo kale macluumaadkaan u mari kartaa adigoo sawiraya furaha QR-ka ee hoose.





Kii daacada kuu ahaa

Wakaalada Daawooyinka ee Danish-ka

MUHIIM! Haddii lagugu daweynayo mid ama in ka badan oo ka mid ah daawooyinka nooca 2 ee macaanka ee soo socda, waa inaad kala hadashaa dhakhtarkaaga daawayntaada mustaqbalka ka hor 25ka Noofambar 2024.

Liiska jaallaha: Haddii aad qaadato mid kamid ah daawooyinkan soo socda, dhakhtarkaagu wuxuu u baahan doonaa inuu qiimeeyo inaad buuxisay shuruudaha cusub ee lacag celinta.

Magaca	Waxaad buuxisay shuruudaha cusub haddii:
Ozempic inj.væske, fylt pen	<ul style="list-style-type: none"> - Aad qabto nooca 2 ee macaanka islamarkaana aadan qaadan karin SGLT-2 inhibitor sababo la xiriira waxyeellooyinka mise shaqada kelyaha oo aad u liidata adigoo waliba qaba: <ol style="list-style-type: none"> (1) cudurrada wadnaha kelyaha; mise (2) ugu yaraan saddex arrimood oo halis u ah cudurrada wadnaha iyo xakamaynta macaanka dhiigga oo liita oo wata metformin. - Aad qabto nooca 2 ee macaanka iyo xakamaynta macaanka dhiigga oo liidata in kastaoo lagu daaweeyay dhammaan kiniiniyada khuseeya macaanka, oo ay ku jiraan SGLT-2 inhibitor.
Trulicity 1,5 mg, inj.væske, fylt pen	
Rybelsus tabletter	

Liiska cas: Haddii aad qaadato mid kamid ah daawooyinkan soo socda, guud ahaan waa inaad u badalataa dawooyin kale si aad mustaqbalka u mutaysato lacag celin.

Magaca	Magaca
Glyxambi filmovertrukne tabletter	Repaglinide "Accord" tabletter
Jentaduetto filmovertrukne tabletter	Repaglinide "Krka" tabletter
Komboglyze filmovertrukne tabletter	Trajenta filmovertrukne tabletter
Minodiab tabletter	Victoza inj.væske, fylt pen
NovoNorm tabletter	Vipdomet filmovertrukne tabletter
Onglyza filmovertrukne tabletter	Vipidia 12,5 og 25 mg filmovertrukne tabletter
Qtern filmovertrukne tabletter	Vokanamet filmovertrukne tabletter
Repaglinid "Teva" tabletter	